

Shaqaalaha saadka xirfad u leh bulqaaska iyo nidaam la'aanta waxay u belaa'yo. Xitaa wakhtiyada maskaxdooda cueys badan saaran yahay shaqadooda wey xafidsan yihiin oo si fiican a'yay uga soo baxa'yaan.

## Shaqaalaha saadka xirfad u leh (Fachkraft für Lagerlogistik)

Maclumaadka shaqadaa:

Shaqaalada saadka xirfad u leh aawaddooda mid muhiim ah a'yay ka tahay saadka. Shaqo fiican a'yay dhamaystira'yaan iyo sida ku nidaamina'yaan: alaab la helay, alaab la iibiyay, keydinta, isku darta laabta iyo diridooda oo alaab kastoo jiraan ka mid yihiin. Guryo keydinta oo waaween gudahood a'yay bilaa khalkhal waxoo dhan sida loo baahan yahay u qorsheyna'yaan. Saadka iyakaa ugu muhiimsan.

Sadaxda sano ee tobabarka tababara'yaasha waxay barana'yaan inay alaabta kombyuutar ku diwaan geli'yaan, qoridda dokumentiyada alaabta la dira'yo iyo dib u eegidda alaabta soo gashay, cabirkood, miisaanka iyo tayadood in la wada qoro. Weliba aad a'yay u tiixraacaan qaanuun kasta oo waafaqsan hawshooda oo ka mid ah caadooyinka iyo alaab halis ah la rara'yo. Ujeedada tobabarkaa waxay tahay inuu tobabare gaadho wax kasta saadka ku saabsan inuu aqoon u lahaado. Waxyaalaha kale ka mid ah waa alaab in la qaabilo dokumentiyada dib loo eego, alaabta noociiba meel gooni ah lagu safo si oo waafaqsan qaanuunka keydinta. Wa in la samayn karaa listada alaabta la rari doono iyo qorshadii sidii loo rari lahaa iyo horteed la sii qorshee'yaa qalabyadii shaqada fududeyso la isticmaali lahaa. Tobabare waa ku waajib inuu qalabyada iyo mashiinada farsameed si fiican u isticmaali yaqaano. Sida daraadeed tobabarka waxa ka mid ah inuu tobabare sameeyo draawal laysanka gaadhiga yar alaab culus lagu raro iyo mesha loogu talagalay lagu keydiyo.

Mar uu tobabarka dhamaaday waxa suurobayso in tobabaro kale lagu dari karo. Sida a'yuu qofka u dalici karaa daraja sare.

Sharuudaha:

Hadii la rabo in la codsado shaqo tobabareed oo lagu noqona'yo gaadiid draawal ama draawalad wa in ugu yaraan dugsiga dhexe ama dugsiga sare lagu qalin jebiyaa.

**Sharkadaha waxay raadina'yaan codsade'yaal fekeradood shaqada ku soo dara'yo, koox la shaqayn karo iyo shaqada ku dadaalan. Wa inuu Af-Jarman yaqaana siday draawalada iyo dadka kale isla shaqee'yaan is fahmaan. Haduu qofka kombyuutarka yaqaano iyo xirfad u leh wax kala nadaaminta waa lagu sii farxa'yaa.**

Mushahar:

Tababare'yaasha sanadaha la tobabara'yo waxay hela'yaan mushahar kolba loo dalaca'yo. Sanadka ugu horee'yo tobabara'yaasha waxay helaan qiyaas ahaan 570 - 720 €. Laakiin sharkadaha wey kala duwan yihiin, waxayna ku saabsan tahay heshiisyada jiro.

**Maclumaadka shaqadaa ma danaynaysaa? Waxa codsad loo dira karaa 500 ee sharkadaha socdaalka oo ka jiraan Hamburg iyo agagaarkeeda! Maclumaad kale waxaad ka helaysaa** www.logistik-lernen.hamburg.

Sprache: Somali